# Ficilada Bulshada

"Dhammaan koritaanka warshadaha iyo isbeddelada webiga, waxa uu sii wadayaa inuu sii qulqulo, ma'aha kaliya biyo, laakiin sidoo kale nafta dadka jeclaaday."

South Park waa bulsho danaysa meesha ay ku nool yihiin, ka shaqeeyaan oona ku ciyaaraan. Kahor inta aysan ahayn xeebtan mid la geli karo, dadka deegaanka waxay ku hammiyi jireen cadaalad u helida iyo dib u habeynta deegaanka, taasoo ku xireysa dadka webiga iyo midba midka kale.

Ka dib 100 sano oo wasakhda warshadaha iyo degmada ah, goobtan waxaa lagu sifeeyay inay tahay goobta Superfund ee Waxqabadka Hore ee Wakaalada Ilaalinta Deegaanka ee Mareykanka. Nadiifin degdeg ah oo ku aadan walxaha halista ah ayaa loo baahnaa. Bulshada Dooxada Duwamish waxay ka arkeen muhiimad webigan waxayna caqabad ku noqdeen qorshayaashii hore ee Dekadda si loogu isticmaalo warshado. Dekaddu way ku aqbashay. Nadiifintu waxay qaadatay shan sano, oo ku ekeyd Disembar 2014. Gelitaanka xeebta webiga iyo hagaajinada dabarka deegaan dabiiciyeedka ayaa daba socday, beertana waxaa loo furay dadweynaha xagaagii 2022.

Goobta Nasashada ee Webiga Duwamish iyo Xeebta Deegaan Dabiiciyeedka ayaa hadda ah hanti bay'adeed iyo bulsheed oo ay dad badani qaabeeyeen. Waxaan sharfeynaa 10,000-sano kulan abtirsiineed dhaladeed ee meeshan. Waxaan u dabaaldegnaa dib u soo celinta beer nadiif ah, badbaado leh oo soo dhaweyn leh. Waxaan ku casuumnaa dadka inay isugu soo uruuraan, bartaan oo ilaaliyaan, iyagoo u qaadaya qiimaha togan mustaqbalka fog.

## U Heelan Wabiga

"Deegaanka wuxuu ka bilaabmaa cagahaaga. Waxaad ku lug leedahay deegaan mar kasta oo aad tallaabo qaado."

Marxuumkii John Beal oo daganaa South Park ayaa loo yaqaanaa geesiga hore ee dib u soo celinta wabiga. Doontiisa gaarka ah ayuu u adeegsaday inuu qashinka ka saaro cirifka biyaha, dad badan ayuu baray wax ku saabsan webiga Duwamish, wuxuuna ku dhiirigaliyay deriskiisa inay la wadaagaan dareenkiisa iyo u doodista deegaanka.




Wakiilnimada John Beal ee Wabiga Duwamish ayaa waxa uu dardar galiyay markii loo sheegay inuu haysto afar bilood inuu sii noolaado. 27-dii sano ee xigay, wuxuu sameeyay saameyn gaareysa inta uu webigu gaarayo. Wuxuu abuuray Ururka Caalamiga ah ee Badbaadinta Nolosha Biyaha (International Marine Association Protecting Aquatic Life Foundation, I'M A PAL), urur xaqiijiyay in dareenka, kheyraadka, iyo daryeelka lagu jiheeyo soo celinta Hamm Creek.

Wuxuu ahaa abaabule iyo hogaamiye, taageeraya nadiifinta adaga ee webiga iyo dib u soo celinta iyada oo loo marayo Duwamish Alive Coalition, Duwamish River Cleanup Coalition, ECOSS, Veterans Conservation Corps iyo in kuwo kaloo badan. Dhaxalka John Beal wuxuu sii wadaa dhiirigelinta dhalinyarada iyo xubnaha bulshada ee Dooxada Duwamish si ay wax ugu qabtaan deegaanka maanta